Waxay kuu dhigeen ma kugu dhaqeen?

Dastuuradii iyo Axdiyadii loo dhigay Jamhuuriyadda Soomaaliya

---

Waxaa Qoray

Abdulaziz Ali Ibrahim "Xildhiban"

LONDON 2005

Xildhiban Publications

Tel: +44 (0) 7984 329 891

Email:
xildhiban@hotmail.com
xildhiban@yahoo.co.uk

First Edition January 2005
LONDON

ISBN: 0-9549555-0-1

All rights reserved; No parts of this publication may be reproduced, stored in a retrival system, or transmitted in any form or by any means, electronic, mechanical, photocopying, recording or otherwise, without the prior permission of the copyright owner.

Xuquuqda Daabacaaddu waxay u keydsan tahay Qoraha Buuggan. Qeyb ka mid lama daabacan karo, lama foto-koobiyeyn karo, lama duubi karo idanka qoraha buuggan la'aantiis.

Waxaa lagu daabacay magaalada London ee dalka Ingiriiska.

Copyright©Xildhiban 2005

All rights reserved

Wixii faahfaahin ah oo ku saabsan buuggan waxaad kala soo xiriiri kartaan:-

For information contact:-

Xildhiban Publications
London 2005

Abdulaziz Ali Ibrahim
"Xildhiban"

Tel: +44 (0) 798 432 9891
Email xildhiban@hotmail.com
xildhiban@yahoo.co.uk

Typeset/Design/Print & Bound by;

i2Design
Unit 1, 200 Mile End Road, London E1 4LJ
info@ink2design.co.uk
tel: +44 (020) 7791 2299

TUSMO

I. Tusmada Buugga 3
II. Hibeyn 5
III. Mahad-naq Ballaaran 6
IV. Gogoldhig 8

Chapter 1 12

Dastuurkii ugu horreeyay ee
Soomaaliya 21kii Juun sanadkii 1960kii
Doorashooyinkii dalka ka dhacay 1960kii ilaa 1969kii
Xaashidii Koowaad Oktoobar, Mog. 21 October 1969kii
Xaashidii Labaad Oktoobar, Mog. Gennaio 1971dii
Xaashidii Seddexaad Oktoobar Mog. 1 Luulyo 1976dii
Dastuurkii ugu horreeyay oo ay soo saareen Ciidamadu 1979kii

Chapter 2 57

Dastuurkii ay soo jeediyeen in lagu dhaqo Dalka 1990kii
Dastuurka "Somaliland" l997 - 2004
Dastuurka '"Puntland" Soomaaliya 2001-2004

Chapter 3 263

Axdigii KMG ahaa ee Soomaaliya, Carte, August 2000
Xeer hoosaadkii Baarlamaankii KMG ahaa August, 2000 Jibuuti
Axdiga KMG Dowladda Federaalka ee Soomaaliya 2004ta
Xeer Hoosaadka Baarlamaanka FKMG ah ee Soomaaliya

Chapter 4 378

Magacyadii Xubnihii
Dowladdii Daaqiliga aheyd ee Soomaaliya
Magacyadii Xubnihii Baarlamaankii
Soomaaliya Sanadkii 1956dii
Magacyadii Golihii Sharci-Dejinta British - Somaliland 1959kii
Magacyadii Xubnihii Baarlamaankii Soomaaliya 1964tii
Magacyadii Xubnihii Baarlamaankii Soomaaliya 1969kii
Magacyadii Xubnihii Golihii Sare ee Kacaanka
Magacyadii Xubnihii Golihii dhexe ee X.H.K.S.
Magacyadii Xubnihii Golihii Shacbiga Qaranka 1985 ilaa 1990kii
Magacyadii Guddigii Sulaxa iyo Badbaadinta Qaranka 1990kii
Magacyadii Xubnihii Baarlamaankii KMG ahaa 2000 ilaa 2004
Magacyada Xubnaha Baarlamaanka FKMG Soomaaliya 2004
Magacyadii Ururradii Siyaasadda Soomaaliya 1943 - 1990kii
Magacyadii Ururradii Siyaasadda Soomaaliya 1990 - 2004tii
Magacyada Ururrada Siyaasadda Somaliland 1990 - 2004

Chapter 5 424

Muuqaallo xambaarsan dhacdooyin Farxad iyo Naxdinba leh
Taariikh nololeedka Qoraha Buugga oo kooban

II

Hibeyn

Buuggan waxaan u hibeeyay dhamaan dadka Soomaaliyeed si ay u ogaadaan wixii dalkooda lagu dhaqay ama lagu maamulay tan iyo intii ay madaxbanaanida qaateen sanadkii 1960kii ilaa maanta-dan aynu joogto.

Sidoo kale waxaan Buuggan u hibeeyay dhamaan dadkii Soomaaliyeed ee Naftooda, Maalkooda iyo Waqtigoodaba u huray soo celinta Midnimadii, Wadajirkii, Heybaddii, iyo Qarannimadii Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo inta ku dadaaleysa sidii ciidda looga qaadi lahaa Calankii Soomaaliyeed, Soomaalida dhexdeeda looga hirgalin lahaa nabad iyo dib u heshiisiin buuxda oo la gaaro.

Somali Unity for Peace and Justice

God Bless Somalia

Abdulaziz Ali Ibrahim "Xildhiban"

III
Mahad-naq Ballaaran

Waxaa mahad iska leh Allihii na abuurtay ee igu hanuuniyay bilowga iyo dhameystirka buuggan, waxaa ku dayasho mudan Nabi Muxamad (NNKH). Waxaan u mahad celinayaa dhamaan asxaabtii gacanta igu siisay la'aantoodna aysan suurtagal noqoteen in aan soo saaro Buuggan, waxaan aad ugu xumahay in aanan halkan ku xusi karin dhamaan dadkii gacanta igu siiyay magacyadooda. Mahad taas la mid ah waxaan u celinayaa xaaskeyga oo gacan igu siisay dhameystirka iyo soo saaridda Buuggan, dulqaad aan yareynna ii yeelatay muddadii dheereyd ee aan ku mashquulsanaa Buuggan. **Marwo Naciimo Cali Xussein**.

Sidoo kale Waxaan mahadnaq aad u weyn u celinayaa **Prof. Cumar Maxamed Xassan "Galagul"** oo isugu igu caawiyay ururinta iyo ka faa'iideysiga macluumaad fara badan oo uu hayay, sidoo kale waxaan mahad gaar ah u celinayaa asxaabtii igu dhiiri galisay soo saarista Buuggan, gaar ahaan:-

1. C/qaadir Cabdi Guutaale
2. Haaruun Macruuf Xassan
3. Cawil Daahir Salaad
4. Maxamed Baashe X. Xassan
5. C/salaam M. Ciise "Salwe"

Marka xigga waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa:-

1. Dr. Xussein Sh. Axmed Kaddare
2. Dr. Xussein Xaaji Max'ed Bood
3. Dr. Xussein Cali Axmed
4. Dr. Shariif Axmadeey Sh. Cali
5. Dr. Muuse Cali Cumar

6. Dr. C/kariim Max'ed Axmed
7. Ing. Sayid Axmed Sh. Dahir

Marka xigga waxaan si kal iyo laab ah ugu mahadcelinayaa:-

1. Drs. Habiba Hagi Jim'ale
2. Avv. Letizia Cariti
3. Drs. Manuela Mariotti
4. Sig. Florio Erna "Silvia Falla"
5. Ms. Maggie McCabe
6. Dahir Abuukar Maxamuud
7. Faadumo C/laahi Cusmaan "Caanadeyste"
8. C/qaadir Maxamuud Axmed "Dadir"
9. Said Ahmed Cabdilwaaxid
10. Abdulkadir Ahmadei Mohamed

Ugu dambeystii waxaan u mahadcelinayaa:-

1. Dr. Mohamud Ali Alassow "Jaani Dheere"
2. Inj. Cumar C/nuur Nuux "Nabadoon"
3. C/qaadir Sh. Cali Maxamuud "Indhabuur"
4. Nuur Xussein Ismaaciil
5. Asad Cabdulle Geeseey
6. C/laahi Maxamed Xassan "Afey"
7. Mustaf Salaad Cawaale
8. Nadiifo Axmed Cabdalle
9. Sahro Faarax Cusmaan
10. Yuusuf Guudle Cusmaan
11. Suleymaan Xassan Calassow

Finally I would like to take this oppurtinuty in thanking the people of the United Kingdom for their tireless support and patience they know who they are, if I were to thank them by name I would have to write another book as there are countless number of people who have made this book possible to happen and lastly I would like to thank Allah (swt) for without Him nothing is possible .

Abdulaziz Ali Ibrahim "Xildhiban"

VI
Gogoldhig

Taxanaha taariikhda sooyaalka ah ee dunidan aynu ku nool-nahay qoraalka waxaa lagu tilmaamaa in uu yahay kan ugu wanaagsan ee lagu gudbin karo dhamaan farriimaha la doonayo in dhaxal ahaan loogu deeqo da'yarta soo koreysa. Waxaa xusid mudan ka dib qoraalkii Afkii Soomaaliga in dadka Soomaaliyeed is weydiinayaan wixii loo dhigay iyo in ay helaan keydkooda taariikheed ama ummadeed.

Soomaalida tirada la og yahay ee wax aqrisaa waa tiro aad u yar waana sababaha ugu badan ee tirtireysa taariikhda ay leeyihiin dadka Soomaaliyeed. Ilbaxnimada iyo waayaha cusub waxaa lama huraan noqotay in la tixraaco qoraalka oo lagu tilmaamo keydka ugu wanaagsan ee jiilba jiilka kale u sii gudbin kara.

Ujeedadu waxay tahay in la helo tixraac si loo horumariyo aqoonta keydsan, maxaa yeelay taariikhdu waa macallin waxay ku bartaa waayihii la soo maray isla markaana kaa weecisaa xumihii la soo maray kuguna toosisaa tubta toosan ee aad u mari laheyd timaadada.

Qoruhu waa iftiimiyaha bulshada, waana aalad warbaahineed oo raadraacda waxii hore loo soo marey ama loo socdo, waxuu ka taariikheeyaa taxanaha sooyaalka soo jireenka ah ee umaddiisa, waxuu kala haadiyaa xumaan iyo samaan waxii la soo maray, waxuu umaddiisa u keydiyaa aragtiyada siyaasadeed ama sugaaneed iyagoo tiraabeeysan isla markaana bukto ama baxnaano reebtay.

Qoraa kasta waxuu abaaraa xaalad soo taxneyd waayo oo la udub dhigey una baahan digniin fariimo qoraal ah oo lagama maarmaan u ah bulshada in loo keydiyo si loo ilaaliyo soo noqoshadeeda una noqoto dhaxal reeb laga fogaado ama maskaxda farxad ku reebta.

"Buuggani Waxay kuu dhigeen ma kugu dhaqeen" waxuu ku sidkan yahay dastuuradii loo dhigey ummadda Soomaaliyeed waa raad raac la aruuriyay oo

lagu saldhigey tixraac si aaney cidna uga wareerin taariikhiyan ummaddan shuruucdii iyo qawaaniintii ay u dhigteen in ay isku sharci maamulaan. Dad badan oo joogay waxey u tahay ku noqosho murugo ama farxad leh, kuwii dibad-joogga ka ahaa ee aan lugta ku laheynna waxey u tahay waayo aragnimo, jiilka dambana waxey u noqoneeysaa darsi ay aqoon ahaan u kororsadaan.

Dadyoowga dunida dacalladeeda ku nool kama sinna horumarka xagga dhaqaalaha, waxbarashada, sancada, IWM, sidoo kale waxay isku dhaafeen xagga garsoorka, dhowrista xuquuqda aadanaha, sarreynta sharciga iyo nidaam dowladeed wanaagsan (Good Government Sysytem), horrumarka dal kasta ka gaaro arrimahaas waxaa saldhig u ah Dastuurka ama Xeerarka ummad kasta loo dhigo iyo sida xukuumad kastaa u dhowrto ku dhaqanka shuruucdii loo dhigay dadka iyo dalka.

Waxaa dhacda in dalal fara badan loo dhigo dastuuro ay ka buuxaan qodobo si wanaagsan loo qurxiyay macaani qiimo badanna ku fadhiyaan hadana aaney cidi iska xil saarin hirgalinta shuruucdaas. Sidoo kale waxaa iyana dhacda in ummad loo dhigo xeerar dulleysanaya xuquuqda qofka muwaadinka ah oo ay xukuumaddu xalaaleysaneyso xuquuqdiisa aasaasiga ah hadaba Buuggan "Waxay kuu dhigeen ma kugu dhaqeen", wuxuu aqristaha xusuusinayaa xeerarkii iyo dastuuradii Soomaaliya loo dhigay tan iyo maalintii ay madax-banaanaadeen laga soo bilaabo Jamhuuriyaddii 1aad ee Qaranka Soomaaliyeed ee curtay 1dii Luulyo 1960kii taas oo shaqeyneysay ilaa 21kii Oktoobar 1969kii.

Ka dib markii ay talada dalka xoogga kula wareegeen ciidamadii militeriga waxaa Soomaaliya u biloowday taariikh cusub oo hor leh taas oo iyana lagu magacaabay dhalashadii Jamhuuriyaddii 2aad ee Soomaaliya soona socotay ilaa 1990kii kolkii kacdoon dadweyne lagu riday xukuumaddii Askarta ee kaligii taliska ahaa. Hadaba waxaa uu qoruhu isu keenay dhamaan xeerarkii kala duwanaa ee dalka loo dhigay mudadaas, dhinaca kale waxa uu xusuusinayaa dastuuradii mudadii lagu jiray jahawareerka siyaasadeed iyo dagaallada sokeeye.

Macluumaadka uu xambaarsan yahay Buuggan tixraac u yahay dadka Soomaaliyeed iyo ciddii daneyneysa arrimahooda. Waa tixraac ma-guurto ah oo looga faa'iideysan karo siyaabo badan ha ahaadeen cilmi baaris, waxbarasho iyo taxanaha taariikhda siyaasadda Soomaalida.

Waxaa muhiim ah in la xuso waqti qoraalladii taariikhda ee Soomaaliya ay ku

sugan yihiin khatar ah in la waayo, in Qoraagu garto faa'iidada ay Soomaalida u leedahay tallaabada geesinimada leh ee uu qaaday uuna ku go'aansaday ururinta dokumentigan qiimaha leh.

Waxaa halkaan ka cad in sababta ku kalliftay soo gudbinta Buuggan ay yihiin kuwo mudan in la garowsado isla markaana loo hambalyeeyo. Ujeedada qoruhu ugu tala galay waxa weeye in uu bilaabo hab diiwaan qoraal ah oo dadka Soomaalida iyo bulshooyinka kaleba u soo raadsadaan raad-raac.

Sidoo kale waxaa ku dhiiri galiyay qoraalkan in dadweynaha Soomaaliyeed helaan caddeyn qoraal ah oo ay ku xisaabtamaan markii la qaadanayay nidaamyadii maamulka siyaasadeed ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Hadaba waxaa iyana xusid mudan waxa ku kallifay qoraaga rabitaanka in uu ku biiriyo dhismaha aqoonta keydsan ee Soomaalida. Dadka qaar ayaa isweydiin kara sababta buuggan isugu keenay qoraallada Dastuuradii, Axdiyadii iyo Xeerarkii lagu soo dhaqay ama la isku dayay in lagu dhaqo dalka, balse uu tacliiq uga bixin waayay, hase yeeshee, qoraagu wuxuu aqoonsan yahay muhiimadda ay leedahay in fikir shaqsi ah lagu raaci karo ama lagu diidi karo in uu ku lifaaqo xaqiiqooyin degsan.

Taas badelkeeda, dadweynaha Soomaaliyeed ayaa loo dhaafay in ay daraasado iyo doodo ka sameeyaan dikomentiyada uu xambaarsan yahay Buuggan. Muhiimaddu waxay tahay in Buuggan fursad u siiyo akhristaha in sideeda loogu soo gudbiyo xeerarkii dalkiisa loo dhigay muddadii uu Qaranka ahaa iyo waayihii burburka si uu isagu marqaati iyo garsoore uga noqdo haddii **"Wixii loo dhigay lagu dhaqay".**